


Coronavirus **COVID-19**



International Protection Accommodation Services (IPAS) COVID-19 Update Wararka COVID-19 ee Cusub



An Roinn Dlí agus Cirt
agus Comhionannais
Department of Justice
and Equality

21 Oktoobar 2020

Wararkii ugu dambeeyay ee COVID-19 ee loogu talagalay degganeyaasha - Cadadka 25

Degganeyaasha Qaaliga ah,

Ku soo dhawoow daabacadii ugu dambeysay ee warsidahaaga Degganeyaasha IPAS. Cadadkan wuxuu bixinayaa macluumaad cusub ee muhiim ah ee ah sida heerarka kala duwan ee Dowlada ee “*Adkeysiga iyo Soo-Kabashada 2020-2021: Qorshe loogu talagalay la noolaanshaha COVID-19*” uu ugu yeelan doono saameyn degganeyaasha marka loo eego waxyaabaha ah sida martida/booqadeyaasha, maqnaanshaha habeen-dhaxa ah iyo codsiyada wareejinta.

Warsidahan wuxuu kale oo ka kooban yahay war cusub ee ku saabsan barnaamijka tallaalka hargabka qaboobaha ee soo socda iyo macluumaad ah



qabanqaabinta gaadiidka ee loogu talagalay carruurta joogta dugsiga ee leh astaamaha COVID-19.

Warsidahan waxaa sidoo kale laga heli karaa online-ka bogga Degganeyaasha ee websaydka Hoyga IPAS (IPAS Accommodation Website) – www.accommodationcentres.ie oo ay la socdaan tarjumaadyo ah luqaddo kala duwan.

Fikradaada dhiibo!

IPAS waxay rabtaa inay war kaa maqasho. Haddii ay jiraan wax mowduucyo aad jeceshahay in lagu daro warsidayaasha/joornaalada mustaqbalka, ama haddii aad qabto wax ah talo soo-jeedin ee ku saabsan sida aan u horumarin karno warsidaha, waan ku farxi laheen inaan war kaa maqalno. Kaliya ku soo dir faallooyinkaaga e-maylka ipasinbox@justice.ie oo uu ku qoran yahay meesha cinwaanka “Jawaab celinta Wasidaha IPAS (IPAS Newsletter Feedback)” oo waa la tixgelin doonaa talooyinkaaga.

Ugu dambeyntiina, waxaan jeclaan lahayn inaan dhamaantiin idinku mahadcelino nala shaqeyntiina joogtada ah ee xilliyadan adag ee lagu jiro iyo waxaan idiin rajeynaynaa dhamaan caafimaad wanaagsan

IPAS Team

Qorshaha la noolaanshaha COVID-19 ee IPAS

Waan ognahay inay xilliyadan u tahay xilliyo aan la hubin deggeneyaasha, sida dhammaanteen ba ay noogu tahay.

Warbixinyada wararka ee joogtada ah iyo macluumaadyada cusub ee ku saabsan kor u kaca kiisaska COVID-19, hadalada-

runta ahayn ee ku saabsan waxa dhici doona iyo fikradaha kala duwan ee ka imaanaya qaybaha kala duwan ee bulshada ayaa noqon kara meelaha jahwareerka iyo welwelka weyn uu ka yimaado.



Rialtas na hÉireann
Government of Ireland

**Resilience and Recovery
2020-2021**

Plan for Living with COVID-19
Qorshaha La Noolaanshaha COVID-19

Kooxda IPAS waxay jeceshahay inay dib ugu xaqiijiso dhamaan degganeyaasha in fayyo-qabkaaga uu sii ahaanayo ka fikirkeena koowaad waxaana sii wadi doonaa inaan si dhow ula shaqeyno maamulayaasha caafimaadka bulshada si aan u sii wadno ilaalinta caafimaadka dhammaan degganeyaasha maaddaama waddanku uu marayo waddada looga baxo dhibaataada COVID-19 oo loo baxo dhinaca kale.

Iyadoo intiina badan aad la socon doontaan, IPAS waxay sameysay nidaamyo ay dajisay laga bilaabay dabayaaqadii bishii Maarso ee sanadkan si ay gacan uga geysato maareynta iyo xakameynta wixii ah faafitaanka fayraska gudaha dhammaan shabakada xarumaha. Nidaamyadaa waxaa lala sameeyay HSE iyo maamulayaasha Caafimaadka Bulshada si loo hubiyo in dadka uu ku dhacay fayraska ay helaan daryeelka iyo fiirista gaarka ah ee sida suurtagalka ahi ugu fiican, iyadoo isla markaas dhammaan degganeyaasha IPAS ee kale laga ilaaliyo wixii ah faafitaan weyn ee fayraska.

Tani waxay nagu ahayd caqabad weyn bilowgii hore laakiinse, sida aan ugu aragnay natiijooyinkii ee baaritanadii taxanaha ahaa ee dhawaan ku samaysay HSE dhammaan shabakadda xarumaha IPAS iyo tirada aadka u hooseesa ee degganeyaasha hadda baaristooda bositif noqotay, nidaamyadaa way shaqeynayaan, oo si fiican bay u shaqeynayaan, mahadana waxaa leh wadashaqayntaada.

Marka ay aheed bartamihii bisha Setembar, Dowladdu waxay daabacday qorshe ka socda ee ah [Adkeysiga iyo Soo-Kabashada 2020-2021: Qorshe loogu talagalay la noolaanshaha COVID-19](#) Qorshaha wuxuu ka kooban yahay shan heer oo kala duwan ee ah xaddidaad loogu talagalay dhammaan dadka ku nool Ireland iyo, iyada oo ay ku xiran tahay sida waynaanta halista COVID-19 uu yahay waqti kasta, Dowladdu waxay u qaadi doontaa heerarkaas kor iyo hoos: Heerka 1 oo ah xaddidaada ugu yar iyo Heerka 5 uu yahay tan ugu sareysa. Qorshaha Dowladda waxay ka kooban tahay dhinacyo badan oo kala duwan ee nolol maalmeedka ah oo ay ka mid yihiin gaadiidka bulshada, shaqaalaynta, booqdayaasha qoysaska iyo is dhexgalka bulshada, helitaanka

maqaayadaha iyo baararka iyo waxyaabaha kale ee la midka ah, dugsiyada, meelaha isboortisga, iwm.

Waxaad ogaan doontaa in Isniinta Dawladda go'aansatay inay dalka oo dhan u qaado **Heerka 5** ee qorshahan si la isku dayo in wax looga qabto kiisaska dhawaan sii kordhaya ee COVID-19 ee wadanka oo dhan. Go'aankan wuxuu daba galayaa talaabooyin hore oo ay qaaday Dowlada si ay kor ugu qaado heerka xaddidaada dalka oo dhan Heerka 3 iyo kor ugu qaado Heerka 4 degmooyinka Cavan, Donegal iyo Monaghan. Ogeysiis gaar ah oo ku saabsan sida u gudubka Heerarka 3 iyo 4 uu u saameeyay degganeyaasha IPAS waxaa la siiyay xarumaha dhammaantood 15 Oktoobar.

Iyada oo la eegayo xawaaraha beddelida heerarka xaddidaada, IPAS waxay hadda dejisay qorshe u gaar ah '**La noolaanshaha COVID-19 ee IPAS**' ee loogu talagalay maareeyayaasha xarumaha si ay u soo bandhigaan tallaabooyin lagu fulinayo heerarka xaddidaada Dowladda si degdeg ah oo macquul ah iyo la hubiyo sii socodka nabadgelyada degganeyaasha.

Qorshahan, oo loo sameeyay iyada oo lala kaashanayo HSE iyo Caafimaadka Bulshada, ayaa laga heli karaa si loo akhristo websaydka Xarunta Hoyga IPAS (www.accommodationcentres.ie) wuxuuna bixinayaa haggis ku saabsan sida mid kasta oo ka mid ah shanta heer ee xaddidaada Dowlada ay saameyn ugu yeelan doonaan xarumaha IPAS .

Si loo helo tixraac fudud, fadlan hoos ka eeg qaybaha khuseeya ee Qorshaha IPAS ee ku habboon xaddidaada Heerka 5 oo saamaynta ugu badan ku leh degganeyaasha, sida booqdayaasha, maqnaanshaha habeen-dhaxa ah iyo codsiyada wareejinta.

Laga bilaabo habeen barka, 21 Oktoobar 2020, illaa iyo ogeysiis dambir (taariikhda dhamaanshaha hadda la dejiyey waa 2 Disembar 2020), tallaabooyinka soo socda ayaa lagu dhaqmayaa gudaha dhammaan xarumaha IPAS iyo hoyga xaaladaha degdegga ah:

Booqashooyinka (Heerka 5)

Asxaabta iyo Qoyska

Booqadayaasha lama oggolo inta lagu jiro muddada xaddidaada Heerka 5.

Booqadayaasha kale

Kaliya Shaqaalaha Muhiimka ah oo ay ku jiraan shaqaalaha IPAS.

Maqnaanshaha Habeen-dhaxa ah (Heerka 5)

Maqnaanshaha guud ee habeen-dhaxa ah

Maqnaanshaha habeen-dhaxa ah waxaa la oggol yahay oo kaliya xaaladaha degdegga ah (tusaale ahaan, xaaladaha qoyska ee degdegga ah) iyo marka looga codsado IPAS si toos ah ama loo maro maamulka xarunta. Looma baahna karantiil marka la soo laabto.

Maqnaanshaha habeen-dhaxa ah oo sababo caafimaad awgood

Maqnaanshaha habeen-dhaxa ah ee daryeel caafimaad ee gudaha xarun caafimaad oo la aqoonsan yahay waa la oggol yahay iyada oo aan xaddidaad lahayn inta habeen ee la maqnaan karo. Looma baahna karantiil marka la soo laabto.

Fadlan ogow:

Qof kasta oo ka maqnaada xaruntooda habeen-dhax iyada oo aan la haysan ogolaansho hore waxaa looga baahan doonaa in karantiil ku galaan 14 maalmood meel ah xarun karantiil ee IPAS dibada ah ka hor inta aysan dib ugu laaban hoyga IPAS.

Wareejinta (Heerka 5)

Wareejinta waa la joojiyey marka laga reebo xaaladaha soo socda:

- marka uu u cadeeyo inay muhiim tahay xirfadle caafimaad takhasusle ah;
- marka ay codsato Gardaí ee sababo badbaadada iyo nabadgelyada mid ama in ka badan ee ah degganeyaasha; ama
- marka ay u aragto inay tahay lagama maarmaan IPAS ee sababo hawlgal degdeg ah oo ay ku jiraan ujeedooyinka isu keenida qoyska.

Wareejinta waxaa laga yaabaa inay ku xirnaato karantiil 14 maalmood ah.

Duqsiyada (Heerka 5)

Dawladda waxay ku talisay inta ka hooseysa heerka 5, dugsiyada iyo xanaanada caruurta inay sii furnaan doonaan iyadoo la raacayo tallaabooyin ilaalin ah.

Waxaa intaa dheer, tacliinta sare iyo tan dadka waaweyn waxay u wareegi assaas ahaan online-ka iyada oo ay la socoto dejinta talaabooyin ilaalin ee habboon oo loogu talagalay marka ay jirto imaansho muhiimka ah goobta dugsiya.

Shaqada (Heerka 5)

Degganeyaasha waxaa laga codsanayaa inay ka eegaan hagista ugu dambaysay ee dowladda gov.ie si aad u aragto sida xaddidaadda Heerka 5 ay kuu saameeneyso iyo u saameeneyso goobtaada shaqada.

Kooxda IPAS way aqoonsanayaan niyadjabka laga yaabo degganeyaasha inay dareemaan, sidoo kale wadanka intiisa kale, iyadoo talaabooyinka adag ee noocan oo kale ah mar kale loo baahan yahay in lala qabsado.

Waxaan kalsooni ku qabnaa taas iyo wadashaqeyntaada joogtada ah aan sii wadi doonno joojinta ku faafida fayraska si ballaaran xarumaheena iyo caawinta inaad adiga, qoyskaaga, saaxiibbadaada bulshada, iyo dhammaan shaqaalaha ka shaqeeya xarumaha, aad nabad iyo caafimaad qabtaan anagoo si wadajir ah u shaqeyneyno gaarida mustaqbal sii wanaagsan.

Tallaalka Hargabka

Anagoo ku sii dhowaannaya xilliga qaboobaha, HSE waxay dadka ku dhiirrigelineysaa inay qaataan tallaalka hargabka si ay naftooda iyo qoysaskoodaba ku hayaan badbaado.

Yaa loo baahan yahay inuu qaato tallaalka hargabka?

Dhammaan dadka da'doodu **ka weyn tahay 65** iyo dhammaan **carruurta da'doodu tahay 2-12** waa inay qaataan tallaalka hargabka.

Kooxaha halista ku jira ee kale oo ay tahay inay qaataan tallaalka hargabka waxaa ka mid ah:

- Haweenka uurka leh
- Kuwa qaba xaaladaha caafimaadeed ee muddada-dheer sida sonkorowga, xaaladaha wadnaha ee joogtada ah, xaaladaha beerka, kansarka, xaaladaha kelyaha iyo cudur sambabaha ee joogtada ah oo uu ka mid yahay COPD, ama cudurada neerfaha
- Shaqaalaha daryeelka caafimaadka
- Daryeelayaasha
- Dadka la leh xiriir dhow digaagga, shimbiraha biyaha ama doofaarrada.

Xagee ka hela tallaalka hargabka haddii aniga, ama xubin qoyska ka mid ah, uu ka mid yahay kooxahaa?

Waxaad ka heli kartaa tallaalka hargabka dhakhtarkaaga guud (dhakhtarka) ama farmashiistaha. Fadlan ballan ka sameyso dhakhtarkaaga guud (dhakhtarka) ama farmashiistaha hadda.

Waa imisa qiimaha tallaalka hargabka?

Tallaalka waa lacag la'aan haddii aad ka mid tahay kooxaha kor ku xusan.

Miyuu talaalka hargabka iga ilaalin doonaa COVID-19?

Maya. Tallaalka hargabka kaama ilaalinayo COVID-19, laakiinse waa muhiim in la qaato tallaalka hargabka si uu kaaga ilaaliyo hargabka.

Macluumaad Dheeraad ah

Fadlan riix linkiyada soo socda si aad u aragto fiidiyoow ku saabsan tallaalka hargabka ee loogu talagalay kooxaha halista ku jira iyo carruurta da'doodu tahay 2-12 oo ah luqqado kala duwan: [Urdu](#); [Ruush](#); [Romaniyaan](#); [Burtuqiis](#); [Booish](#); [Mandarin](#); [Faransiis](#); [Carabi](#)

Intaa waxaa sii dheer, taxane ah waraaqo la turjumay iyo tilmaamo si sahlan loo akhrin karo ee ku saabsan talaalka hargabka ayaa la heli karaa si looga soo dejisto websaydka HSE. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan riix [halkan](#).

Qabanqaabinta gaadiidka ee carruurta dugsiga joogto eel eh astaamaha COVID-19

Macluumaadka Taariikheed

Wadado-qaadka Waaxda Waxbarashada iyo Xirfadaha ee ku noqoshada buuxda ee dugsiga, oo la daabacay 27 Luulyo lana cusbooneysiisay 5 Ogosto, waxay sheegaysaa: -

Marka ay jirto **kiis looga shakisan yahay COVID-19 dugsi gudihiisa**, Tilmaamaha Qorshaha Jawaab celinta ee COVID-19 ayaa sidoo kale qeexaya talaabooyinka ay tahay in dugsiyada ay qaadaan ee ah sida soo socda



- Keen qofka meesha loo qoondeeyey go'doominta ee laga heli karo dugsi kasta;
- Qababqaabi inaad laxirirto waalidiinta/ilaaliyaha haddii ay dhacdo kiis looga shakisan yahay arday;
- Fududee in uu qofku ku jiro go'doominta haddii uusan isla markiiba guriga aadi karin;
- Taageer sameynta qabanqaabinta gaynta guriga ama, haddii ay aad u jiran yihiin aysan aadi karin guriga, in lala xiriiro 999 ama 112 si loogu sheego inay tahay kiis looga shakisan yahay COVID-19;
- Samee qiimeyn ku saabsan dhacdada si loo go'aamiyo tallaabooyinka xigta ee ah in la seemyo; iyo
- qabanqaabi nadiifin habboon ee goobta go'doominta iyo goobaha shaqada.

Marka uu jiro kiis looga shakisan yahan ama la xaqiijiyey ee COVID-19 dhexda shaqaalaha ama ardayda dugsiga, dugsiyada waxay u baahan yihiin inay ilaaliyaan marwalba qarsoodida labadaba shaqaalaha iyo ardayga oo waa inay raacaan tilmaamaha **Caafimaadka Bulshada ee HSE**.

Wax qabadka uu sameenayo Maamulaha Xarunta

Xaaladaha aan waalidku uu awoodi karin inay qabanqaabiyaan qorshooyinka gaadiidkooda u gaarka ah, iyo marka uu dugsigu ku yaalo meel ka fog xarunta hoyga, talaabooyinka soo socda waa in la raaca:

1. Maamulaha xarunta waa inuu ballamiyaa taksi, oo lacagta celintana horay loogu sii heshiiyaa;
2. Taksiga waa in loo sheegaa inuu waco xarunta si loo soo qaado waalidka/ilaaliyaha ah inuu u raaco ardayga guriga marka uu ka tagayo dugsiga;
3. Xaaladaha aan waalidku la heli karin, waa inay u magacaabaan qof weyn oo mas'uul ah inuu raaco taksiga si uu ilmaha uga soo wado dugsiga;
4. Marka uu ilmaha ka weyn yahay 16 sano jir waalidka waa inuu u oggolaadaa ilmaha inuu raaco taksiga isaga oo aanu la socon qof;
5. IPAS waa in lagu ogeysiiyaa emayl duruufaha dhalisay in la balansado taksiga; iyo
6. Biilasha waa in loo gudbiyaa IPPS si ay u bixiso.

Fadlan ogow in IPAS ay xaq u leedahay inay dib u eegto maamuuskan/borotokool sida loogu baahan yahay.